



OFFICE OF ARTS & CULTURE
CITY OF SEATTLE

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo ee Farshaxanyahannada (fannaaniinta) Tilmaamaha 2024-25

Dulmarka Deeqaha

Xarunta Fanaaniinta waa wada shaqayn sanado badan socota una dhaxeysa [Seattle Office of Arts & Culture](#) (Xafiiska Fanka Seattle & Dhaqan) iyo [Seattle Center](#) (Xarunta Seattle), oo taageero ka helaya [Uptown Arts & Culture Coalition](#) (Iskaashatada Dhaqanka iyo Fanka ee Aptown) iyo jaaliyadaha ku teedsam Xarunta Seattle. Mashruucan waxaa suurtageliyay deeq 10-sano ah oo faa'iido bulsho ah oo laga helo [Climate Pledge Arena](#) iyo [Seattle Kraken](#), laga bilaabo 2021.

[Fanaaniinta Xaruntu](#) waxay maalgaliyaan fanaaniinta gaarka ah, kooxaha, iyo ururada si ay u horumariyaan una soo bandhigaan bandhigyo soo shaac baxay sanadka oo dhan Xarunta Seattle. Waxay maalgelisaa fanaaniinta, kooxaha, iyo ururada si ay u horumariyaan una soo bandhigaan bandhigyo soo baxay sanadka oo dhan. Bandhigyadu waxay dhacaan inta u dhaxeysa Octoobar 2024 iyo Sebteembar 2025. Ka qaybgalayaasha la xushay waxay heli doonaan mid ka mid ah \$2,000, \$4,000, ama \$6,000 maalgelinta ku salaysan fanaaniinta/kooxda cabbirka iyo kakanaanta baaxadda. Kuwa la abaalmariyey xilligan hadda (2023-2024) uma qalmaan inay codsadaan xilliga 2024-2025.

Macluumaadka iyo caawimaadda codsiga, fadlan tixraac [Su'aalaha Inta badan La Isweydiyo](#), ama la xiriir Alex Rose, Maamulaha Mashruuca Artists at the Center, **(206) 459-6517** ama Alex.Rose@seattle.gov.

Waxaan leenahay turjubaano kugula hadli kara luqadaada, oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha Ameerika (muuqaal ahaan). Nasoo wac oo noo sheeg luqadaad ku hadasho. Filo hakad gaaban inta aan heleyno turjumaan si uu ugu biiro wicitaanka.

Codsiga

Ku soo gudbi codsigaaga onlayn iyada lagu dirayo bog-khadka deeqda ee magaalada Seattle: https://seattle.fluxx.io/user_sessions/new

Haddii aadan haysan kombuyuutar ama internet, ama aad qabto caqabado kale si aad u codsato, la xiriir Alex Rose, Maareysada Mashruuca **(206) 459-6517** ama Alex.Rose@seattle.gov.

Taariikhda ugu danbeysa

Talaado, Juun 25, 2024, 5 galabnimo (Pacific)

U qalmida

Waad u qalantaa Codso deeqdan hadii aad buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxaad tahay farshaxan shakhsi ah, urur, ama koox jaaliyad ku salaysan, ama si joogto ah uga soo bandhigta shaqada gudaha Seattle.
- Waxaad haysataa nambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka (Lambarka Amniga Bulshada, ITIN, ama Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha) oo ku saleysan, ama aad leedahay barnaamij hadda jira oo firfircoon, ee Magaalada Seattle.
 - Kooxaha codsanaya loogama baahna inay noqdaan 501 (c) (3) aan faa'iido doon ahayn, sidoo kale loogama baahna inay isticmaalaan wakiil maaliyadeed.
- Waxaad soo gudbin kartaa hal codsi sannadkiiba barnaamijkan.
- Kuwa la abaalmariyey xilliga hadda (2023-2024) **uma qalmaan** inay codsadaan xilliga 2024-2025.

Bandhigyadadu waxay u qalmanin lagu maalgeliyo deeqdan haddii ay buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxqabadkaagu wuxuu ahaan doonaa mid bilaash ah oo u furan dadweynaha.
- Waxaad yeelan doontaa caymis kulan bandhigeed.
- Bandhigu wuxuu ku dhaman doona 90 daqiiqo ama ka yar.

Maalgelinta

Codsadayaashu waxay codsan karaan heerarka soo socda ee maalgelinta:

- \$2,000 abaal-marin (sida caadiga ah 1-2 fanaaniin), oo lagu daray \$680 taageero wax-soo-saar ah oo laga helo Xarunta Seattle
- \$4,000 abaal-marin (sida caadiga ah 3-5 bandhige), oo lagu daray \$1,235 taageero wax-soo-saar ah oo laga helo Xarunta Seattle
- \$6,000 abaal-marin (sida caadiga ah 6+ bandhige), oo lagu daray \$1,700 taageero wax-soo-saar ah oo laga helo Xarunta Seattle

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada taageerada wax soo saarka ee la heli karo waxaa laga heli karaa [Su'aalaha Inta badan la Isweydiyo](#).

Kulamada Macluumaadka

Baro wax badan oo ku saabsan barnaamijka iyo sida loo gudbiyo codsigaaga ugu fiican.

Macluumaadka Kulanka 1aad (mid isku jira)

Khumiis, May 16, 4:00-5:20 galabnimo (Pacific)

Qof Ahaan: Seattle Center Armory, Loft 4
Fogaan Arag (Maqal iyo Muuqaal):Webex
[JAWAAB-CELIN](#)

Macluumaadka Kulanka 2aad (mid isku jira)

Khamiis, Juun 13, 10:00-11:20 subaxnimo (Pacific)
Qof Ahaan: Seattle Center Armory, Loft 4
Fogaan Arag (Maqal iyo Muuqaal):Webex
[JAWAAB-CELIN](#)